Maaddo:Juqraafi **Fasalka:F4** **Casharka 1: Cilmiga**

Magaca:_____Tarikh:18/09/

1. **Cilmiga jiyooloojiga** waa aqoonta ama cilmiga la xiriira barashada ama daraaseynta Isbeddellada iyo diinaamikida (dhaqdhaqaaqa) dhulka iyo ilaha tamarta ee dhulka Dhex jira.

2. Laamaha cilmiga jiyooloojiga

Jiyooloojiyada bay'ada (deegaanka): Cilmigani wuxuu quseeyaa barashada iyo daraaseynta carrada, biyaha iyo in laga shaqeeyo xal u helidda iyo maareynta meelaha ku waxyeelloobay wasakhowga deegaanka.

A. **Jiyooloojiyada bay'ada (deegaanka):** Cilmigani wuxuu quseeyaa barashada iyo daraaseynta carrada, biyaha iyo in laga shaqeeyo xal u helidda iyo maareynta meelaha ku waxyeelloobay wasakhowga deegaanka.

B. **Jiyooloojiga handasada:** Cilmigani wuxuu u taagan yahay in xeeldheerayaasha jiyooloojiga ay qeyb ka noqdaan helitaanka qorsho mustaqbaleed oo la xiriira waxyaabaha laga dhisayo guryaha, buundooyinka, waddooyinka iyo biyo xireennada kadib marka la daraaseeyo awoodda dhadhaabyada, heerka sinnaanta iyo janjeedhka oogada dhulka iyo qaab dhismeedka carrada.

C. **Jiyooloojiga waxbarashada:** Qeybtani waa qeybaha aynu ku arkeyno islamarkaana aynu ku daraaseyneyno heerarka kala duwan ee wax barashada asaasiga ah iyo tan jaamacadeed.

D. **Jiyoolojiga saliidda iyo dhaqaalaha:** Laan ka mid ah laamaha cilmiga jiyoolojiga ee ka hadasha ama quseysa ilaha tamarta dabiiciga ah sida saliidda, dhuxusha, alaabta caydhiinka ah iyo gaaska dabiiciga ah.

3. Xeeldheereyaasha cilmiga jiyoolojiga waxay isku raaceen in da'da dhulka loo Qeybiyo afar waa, waa' kastana wuxuu usii qeybsamayaa xilliyo, waa' kasta iyo xili Kasta Wuxuu leeyahay koox dhadhaab lakabeed ah, nolol xayawaan iyo mid dhir oo Isaga u gaar ah, taa oo uu kaga duwan yahay lakabyada kale.

4. Waxa lagu qiyaasaa da'da dhulka **2000** milyan sano,halka qolofta dhulka dadeeda Lagu qiyaso **1500** milyan sano.

5. Waayada jiyoolojiyada waa
   A. **Kambiriyan ka horreeye** (arche or pre-cambrian time)
   B. **Waayadii baaliyosooiga** (paleozoese)
   C. **Waaga labaad** (waagii mesoosoik/waagii nolosha dhexe)
   D. **Waaga sadexaad**(kinozoil)
   E. Waaga cusub
6. ahmiyadda dhaqaale ee waaga kambiriyanka waxay ka koobanyihiin:
   A. Dahabka
   B. Qalinka
   C. Maarta
   D. Sinkiga
   E. Birta
   F. Karoomka
   G. Niikalka
   H. Tiinka
   I. Balambamka
   J. Macaadinta shucaaca bixisa
   K. Macaadinta shiilcadka iyo garanaytka
7. waagii baaliyosooiga waxaa lagu tilmaamaa inuu ahaa waayada jiyoolojiyada kan ugu dheer.
8. Waaga baaliyosooiga xilliyadiisa waxa loo kala qeybiyaa:

A. Xilliga kambiriyanka
B. Xilliga jordonofishka
C. Xilliga siluriyanka
D. Xiliga difoniyanka
E. Xilliga kaarboonka
F. Xilliga bermiyanka

9. Ahmiyadda dhaqaale ee waaga baaliyosooiga wuxuu ka koobanyahay:
   A. Caydhiinka macaadinta
   B. Birta iyo manganeeska
   C. Faar dhuxul ah
10. Xilliyada waagii mesoosoik waxaa uu ka mid ah
   A. Xilliga tiriskiga
   B. Xilliga turaasik
   C. Xilliga kiritaasiga
11. waagii mesoosoik wuxuu fidsanyahay 160 milyan.
12. Ahmiyadda dhaqaale ee waaga mesoosoik wuxuu ka koobanyahay
   A. Saliidda
   B. Birta caydhiinka ah
   C. Foosfeytka iyo dhadhaabta loo yaqaan balestarka.
13. Waagii kenazoi waxaa soo baxay taxane buuro ah sida buuraha Albee eek u yaala Yurub,Rooki IYO Andiis oo ku yaalla qaaradda Ameerika
14. Waagii kenazoi da’diisu waxaa lagu qiyaasaa 63 milyan oo sano.waa waaga dhirta ubaxa leh ay yeelatay muuqaalka manta ay leedahay.
15. Ahmiyadda dhaqaale ee waaga Kenazoi wuxuu ka koobanyahay
   A. Salfarka caydhiinka ah
   B. Sinkiga
   C. Balambamka
   D. Saliidda
16. Waaga cusub waxaa kaloo loo yaqaanaa waagii **barafka** , sidoo kale waagii **roobka**.

17. Waaga cusub waxaa lagu qiyaasaa inuu yahay waagii uu aadanuhu soo ifbaxay.
18. Waaga cusub waxaa uu dherer ahaan jiraa 3 milyan oo sano. Waxaana loo kala saaraa laba xilli:
    A. **Xilliga Baliyostiinka:** waxaa lagu qiyaasaa 2 milyan oo sano.
    B. **Xillia cusub:** waxaa lagu qiyaasaa 1 miliyan oo sano.
19. Ahmiyadda dhaqaale ee waaga cusub wuxuu ka koobanyahay:
    A. Sibsibka
    B. Qururuxa
    C. Carrada iyo dhoobada
20. Dadaallada muslimiinta ee la xiriira cilmiga jiyoolojiga waxaa ka mid ahaa:
    A. Muslimiintu wexey ku dhiseen cilmiga jiyoolojiyadda qaab maangal ah halka giriiggana ay u cuskadeen qaab khuraafaad ah iyo sheeko baralley.
    B. Sanadka markuu ahaa **210 H** eek u began **825 CD** muslimiintu waxay sameeyeen inay cabbiraan dhexroorka dhulka iyo wareegga dhulka halkaas oo ay uga ekaadeen culimada casriga ah.
    C. Saynisyahanka **Ibnu Siinaa** ayaa ka sheekeyey buugaagtiisa cilmiga dhulka sida buuggiisa **Al-Shifa**.
    D. Ibnu siinaa wuxuu ahaa saynisyahankii ugu horeeyey eek a hadla waxaa loo yaqaan dhul go’ iyo qardunka oo saba foolkaanaha
    E. Saynisyanka wuxuu kaloo ku daray in sanmaysanka buuraha ay sabab u tahay waxyaabaha carro guurka iyo dhaqdhaqaaqa dhulka gaar ahaan kor u soo kaca.

Dadaal wacan Mahadsanidiin